

Haddii aan nahay Victim Support (Taageerada Dhibanaha) waxaan la murugaysan nahay rabshadaha dhawaan dhacday iyo nacaybka lagu arkay daafaha Boqortooyada Ingiriiska. Weerarada qaska iyo isir nacaybka iyo Islaam nacaybka ku dhisan ee loo gaystay shaqsiyaadka iyo bulshooyinka run ahaantii waa kuwo lala yaabo oo gabi ahaanba aan la aqbali karin.

Maaha keliya dadka bulshada kamid ah ee jir ahaan waxyeellada loo gaystay waxa dhibaataadu gaartay. Dadka kale ayaa lagula kici karaa aflagaadooyin isir nacayb ah, ama in hantidooda la burburiyo ama la dhaco.

Dad badan ayaa laga yaabaa inaysan saamayn toos ah kasoo gaarin xadgudubka jireed ama aflagaadada, laakiin hadda ku jira cabsi ay ka qabaan arintaan - kana baqaaya inay sii wataan nolol maalmeedkooda.

Maaha in qofna ku noolaado cabsi, walwal iyo waxyeello shucuureed iyo mid jireed oo kasoo gaarta danbiyada isir nacaybka.

Waxaan kasoo horjeednaa nacaybka iyo takoorka waxaana si sharaf leh u taageereynaa dadka waxyeelladu soo gaartay.

Haddii waxyeelo kaasoo gaartay dhacdooyinkii dhawaan dhacay, waxaad wici kartaa laynkeena taageerada ee bilaashka ah marka aad doonto maalin iyo habaynba [08 08 16 89 111](tel:08081689111). Waxaan bixin karnaa adeegga turjumaada haddii aad ku qanacsan tahay inaad luuqad kale ku hadasho.